



# Ma hysaa hidise ka fiican?

**Göteborgsförslaget**

**Qofka haya fikrado ku saabasna  
sida aan u wanaajin karno nolol  
maalmeedka Göteborg gudaheeda.**

# Fadlan keen hindisahaaga Göteborg

Ma haysaa fikrado badan oo madaxaaga ku wareegaya oo ku saabsan sidii aan u wanaajin lahayn nolol maalmeedka gudaha magaala Göteborg? Wuxuu aad hadda hindisahaaga si toos ugu soo diri kartaa bogga intenetka ee magaalada Göteborg. Halkaa sidoo kale waxbaad arkin kartaa, waxaad ku qori kartaa faalo isla markaana waxaad ugu codeyn kartaa hindisaha dadka kalekeenen. Haddii 200 oo qof oo kale uu fikirkuun isku mid noqdo waxaa Hindisahaas loo sii gudbin doonaa siyaasiyiinta arinkaas qaabilnsna si ay go'aan uga gaadhaan.

## Sidan baad sameyn doontaa si aad u soo gudbiso hindisahaaga Göteborg:

1. Fadlan gal bogga inteteka ee [www.goteborg.se/goteborgsforslaget](http://www.goteborg.se/goteborgsforslaget)  
*FIIRO GAAR AH! Boggani waxaa uu ku qoranyahay luqada af iswiidhishka oo kaliya sidaa darteed waxaa loo baahanyahay in hindisahaagu uu sidoo kale ku qornaado luqada af iswiidhishka. Waxaa arinkaas kaa caawin kara medborgarkontoret.*
2. Waxaa loo baahanyahay in aad sameysato koonto adiga oo ku qoraya magaca, macluumaadkaaga ku saabsan sida laguula soo xidhdiidhi karo iyo e-meylkaaga
3. Waxaa markaa ka dib laguu soo diri doona e-meyl, waxaan loo baahanyahay in aad riixdo linkiga ku lifaaqan e-maylka laguu soo direy
4. Ku qor hindisahaaga foomka ku jira bogga internetka. Hindisahaagu waa in uu ka koobnaado ciwaan, gunaanad iyo shaarxaad ka hadleysa hindisahaaga. Wuxuu aad ku soo lifaaqi kartaa sawiro. Tijaabi marka hore ka dibnaa soo dir.
5. Marka hindisahaaga la daabaco ama la soo saaro waxaa laguu soo diri doonaa e-meyl.

## Talooyin!

Fadlan ku xayeysiid hindisahaaga adiga oo adeesnaya saxaafada  
Bulshada sida Facebook iyo Twitter.

## Ma rabtaa in aad ogaato macluumaad dheeri ah oo ku saabsan hindisaha magaalada Göteborg (Göteborgsförslaget)?

[www.goteborg.se/goteborgsforslaget](http://www.goteborg.se/goteborgsforslaget)  
(bogga internetku waxaa uu ku qoranyahay oo kaliya luqada af iswiidhishka)

## Fadlan nala soo xidhiidh!

goteborgsforslaget@goteborg.se  
xarunta lala soo xidhiidhayo 031-365 00 00

## Hindisaha jidka goteborg (göteborgsförslagets väg)



### 1. Soo gudbi hindisahaaga

Qof kasta oo raba in uu soo gudbiyo hidise wuu soo gudbin karraa, xitaa qofka degen banaanka magaalada Göteborg isla markaana ah caruur ama dhalinyaro.

### 2. Hindisaha waxaa lagu soo bandhigi doonaa

Waxaa laguu soo diri doonaa e-meyl marka la tijaaabiyo hidisahaag isla markaana uu ka soo muuqdo bogga internetka.

### 3. Codee isla markaana ka faaloo

Hindisaha waxaa loo codeyn doonaa muddo 90 maalmood gudahood ah. Waxaa loo baahanyahay in gudaha loo gallo bogga intenetka si looga bixin karo faalo isla markaan loo codeyn karo. Hindise kasta waxaa loo codeyn karraa hal mar oo kaliya.

### 4. Siyaasiyiinta ayaa go'aan qaadan doona

Haddii hindisuhu uu helo ugu yaraan 200 cod 90 maalmood ka dib waxaa loo gudbin doonaa guddi waaxeedka qaabilsan ama guiddida maamulka, kuwaas ayaan go'aan ka qaanad doona hindisaha.

### 5. Waad ogaan kartaa wixii dhacey

Marka siyaasiyiintu ay ka gaadhaan go'aan hidisihi aad soo gudbisey waxaa laguu soo diri doonaa e-meyl lagugu wargalinaya natijjada ka soo baxday. Waxaa kale oo xitaa lagu daabici doonaa bogga internetka.

### 6. Hindisaha waa la kaydin doonaa

Dhamaan hidisayaasha oo dhan waa la sii kaydin doonaa, bogga internetka waa laga baadhi karraa lagana akhrin karraa si dhamaan dadka oo dhan u akhrisan karaan hindisayaasha la keeney iyo waxa ay ku jawaabeen siyaasiyiintu